

Xulka Maansada iyo Xuska Abwaanka

Abwaan Cabdilaahi Qarshe (IHUN)

Ma runtii baynu qarxinaa ma beentaynu isku qooshnaa
Ma qoorkaynu ka idlaynaa ma qolof baynu sii saarnaa
Riyahaa qaawan baa idahaa ku qoslee
Ma waxbaynu qalanaa mindiyahaa qarsanaa
Ma qaran baynu ahaanaa oo qabiilaynu huwanaa
Ma qayrkeen baynu hiigsanaa oo **talaabaynu dib** u qaadnaa
Waa xabaalaha ma qodnaa qudhunkii ma faqnaa

Ma runtii baynu qarxinaa ma beentaynu isku qooshnaa
Ma qoorkaynu ka idlaynaa ma qolof baynu sii saarnaa
Riyahaa qaawan baa idahaa ku qoslee
Ma waxbaynu qalanaa mindiyahaa qarsanaa
Ma qudhii baynu jarnaa oo magtii baynu qaybsanaa
Ma xeerkii baynu qubnaa oo qarankaynu bixinaa
Waa xabaalaha ma qodnaa oo qudhunkii ma faqnaa

Abwaan Cabdilaahi Qarshe (IHUN)

Warfidiyayaasha hawada ka sii libdhaya waxaa ka mid ah codbaahiyaha Beenta iyo Baafinta Colaada (BBC) ,haddaan dibuhabeyn lagu sameyn hab dhaqankiisa iyo tayada shaqaalaha ka shaqeeyaba.Markay idaacadaasi soo gasho eed dib u jaleecdo xusuusta waayo waayo, ayaa waxaad dareemaysaa in muunad ahaan ay u sii jirto idaacadaasi.Hase yeeshi waxaa mar kaliya ku soo jiidanaya oo dareen xusuus leh kugu beeraya markaad maqasho muusiga ay ku soo gasho idaacadaasi.Bishii Juulaay 18, 1957 ayaa albaabada loo furay.Markaa waxay aheyd laba barnaamij oo midba 15 daqiiqo ah oo todobaadle ah.Horaantii September 1958 ayeyse idaacadu isku badashey maalinle,waqtiguna loo badaley 30 daqiiqo..

Barnaamijyo tayo leh iyo shaqaale aqoon u leh xirfadooda warfaafinaa ed waa waxa la tabayo.Qalinka aan hakiyeee,muusigaa ay ku soo gasho ayaa lagu magacaabaa socodkii Araweelo.Hees hore u jirtay ayey aheyd,hase yeeshi markii la cadsadey dhawaaq muusigeed lagu furo idaacadaa ayaa abwaan Cabdilaahi Qarshe(IHUN) erayadii aanu u gudbin ee uu muusikadaa u gudbiyey.

Cabdilaahi Qarshe laguma yaqaan sameynta erayada oo qudha ee wuu ku xeel dheeraa laxan sameynta, garaacista kamanka ,iwm. Dadka qaar ayaa si geesinimo ku dheehan tahay ugu dhawaaqa inuu ahaa qofkii ugu horeeyey tumista Kabanka u wanqalay.Maansooyinka Cabdilaahi Qarshe Wuxuu Cabdilaahi Qarshe ay wada sameyn jireen laxanada Abwaankii Maxamed Xuseen”Gu roon Jire”.Waxaa runtii labadooda ka dhexeyn jiray tartar caafimaad qaba.Hase yeeshi mar la waydiiyey Cabdilaahi Qarshe qofka ugu wanaagsan laxan sameynta ee uuyaqaanay ayuu si kalsooni ku jirto oo deeqsinmo leh u yidhi: “Qofku Soomaalida ugu laxan sameynta wanaagsanaa waa Maxamed Siciid “gu’ roon jire”,isku

mar baanu bilawnay sameynta laxanada.Wuxuuse sameyn jiray laxan wanaagsan uuna si la yaab leh ugu tumi jiray Cuudka". Tani waxay muujinaysaa tartanka wanaagaa ay ku jireen iyo toosnaanta Cabdilaahi Qarshe.

"Markii BBC-da la sameynayey waxaan ka shaqeynayey idaacadii Hargeysa. Markaasaa la igu yidhi cod ay ku furaan u soo samee. Kolay shucuur wadaninimana way igu jirtay ,markaa heestaas oo midho laheyd ayaan u geeyey codkii. Hadaan heesta midhaheeda sheegi lahaa may qaateen. Sidaa daraadeed ayaan magacii u badaley magaca ah Socodka Araweelana" sidaa ayuu yidhi Cabdilaahi Qarshe mar laga wareystay codkaa socodka Araweelo.

Dadkan dhaqawaaqayaa	dhulkooga doonayaa
Haddey ku dhiidhiyeen	Allahayoow u dhiib
Waxaan la dhuubnahay	jidhkaya dhaawacaan
Idiin dhamaynayaa	dhagaha ma lihidiin
Mise dad dhoohanoo	dhagaysan waanadoo
Warkaygu dhaafayoo	dhufaanan baad tihin
Dhurwaaga meerayaa	kadinka uu u dhaco
Dhacaa ma jiidhayo	dharag ayuu fishaa
Dhurdaha duulayaa	dhirtuu dalooshadaa
Malabka uu dhurtuu	jilaalka dheer cunaa

Dalka Soomaliland ayaan manta u dawlad kasta oo qabsataa ku dadaaleysaa inay aduunyada la garnaqsato.Cabdilaahi Qarshe wuxuu ka mid ahaa dadkii u hawlgalay in xornimadii lixdankii la helo,sidoo kalena markay dhacantey in badan u hawlgalay sidii dib loo hanan lahaa ee Soomaaliland u noqon laheyd wadan taagan oo jira. Waxaa ayaan daro weyn ah meel ka dhacna ah in qof aan halgankaa ka warqabin ku dhiirado odhaahda ah "In Shirka ay (Somaliland) ka soo qeybgalaan annagu raalli baannu ka nahay. Waxa laga hadlayaa waa dan Soomaaliyeed, Soomaali weeye iyaguna sida Puntland uga soo qeybgalayso, Gal-mudug, Ahlusuna u imaneyso sidaas ayaan iyana jecelnahay in ay iyaguna u yimaadaan oo miiska wadatashiga iyo wadahadalka ka soo qeybgalaan". Cabdilaahi Qarshe oo ka murugoonyo sidii dhayalka aheyd ee maandeeq ayeey gacan aan u rooneyn aan gacanta ugu galinay Lixdankii ayuu tiriyey maansadii "**Lixdankaan Haybin jiray**".Waxaanu abwaanku yidhi:

Hashaan tobant sanno u heesaayey
hashaan tobant sanno u heesaayey
hogaankiyo heeryadiiba cuntee
lixdankaan haybin jiray maxaa helayee????

hamuun korodhsadayee halaagna mutee
hawadaan qabayee hungaad noqotaan
lixdankaan haybin jiray maxaa helayee????

horseednimadii bagay i hoddee

hawshii rag lahaa waa kuwaa hurdoo
lixdankaan haybin jiray maxaa helayee????

halkii dadkaba qaar haayirayee
nin hoos ku jiray iyo kuwaa ku hadhayoo
lixdankaan haybin jiray maxaa helayee?????

Cabdilaahi Qarshe wuxuu ka mid ahaa kooxdii ku caano maashey magaca Walaalaha Hargeysa.Waxaa lagu mileeyaa inay kooxdaasi jirtay 1945 ilaa 1960.Waxaa kaloo koxdaas ka mid ahaa Ina Axmad Guuleed, Ina Nuur Qabaas oo ahaa ninka "Raaxeeye" alifay, Xuseen Aw Faarax, Maxamad Yusuf, Cali Sugule, Ismaaciil Axmad [Cagaf], Tayuub Caamir, Barkhad Cas, Maxamad Axmad, Baaniyaal,Gidhin, Xasan Samatar, Maxamad Saciid, Cunaaye, Xasan Nahaari, Cumar Dhuule, Guroon_Jire iyo qaar kaloo badan.

Cabdilaahi Qarshe isagoo jooga Cadan ayaa wuxuu aad u dhageysan jiray heesaha Hindiga iyo Carabiga oo ka socon jiray idaacadii Cadan.Sidoo kale waxaa isla Idaacadaasi soo dayn jirtay 30 daqiqo oo Af Soomaali ah una badan gabayo iyo warka oo uu akhriyi jiray Mahdi Ileeye. Waxaa in badan saaxiibadiisii Hindida iyo Carabta ahaa ay waydiin jireen Soomaalida waxa maansadii Soomaaliyeed u diiday muusig (Danan). Warcelinta waydiintaa ayaa aad ugu mudnaatey.Si uu uga warceliyana Cabdilaahi Qarshe wuxuu u hawlgalay sameynta laxan ku sargo'an maansooyinkii Soomaaliyeed iyo garaacista qalabkii waqtigaa jiray. "Bilawgii danan Soomaaliyeed hormoodkeedu wuxuu ahaa Cabdilaahi Qarshe" ayuu yidhi Maxamed Cabdilaahi Xudaydi oo ka waramaya taariikhdiin danaka Soomaaliyeed.

Cabdilaahi Qarshe waxaa runtii aad u dhibay Carabtii iyo Hindidii uu la koray oon u heelanayn inay wax baraan, iyo sida aanay marna ugu fidin gacan qabasho.Hase yeesh ee Cabdilaahi Qarshe wuxuu aad u soo dhaweyn jiray,gacan qabasho hagar la'aaneedna u fidiyey dad fara badan oo maanta ku caan ah madasha fanka. "Waxaan fanka soo galay kuna soo biiray aniga oo da'yar gu'gii 1954.Waxaanan gacan ka helay fanaaniintii aniga horeeyay oo ay ka mid ahaayeen Cabdilaahi Qarshe iyo abwaan Xuseen Aw Faarax Dubbad" ayuu yidhi Fanaanka Maxamed Kuluc oo ka hadlaya taariikh faneedkisii.

Cabdilaahi Qarshe wuxuu ahaa wadani ay aad ugu dheer tahay u hiilinta wadankiisa iyo hanka qaranimo.Cabdilaahi Qarshe maansooyinkiisa uu laxankana saaarey codkiisa toolmoona inagu soo gaadhsiiyey waxaa ka mid maansada "Dhalintii Wadanka".Waxaa maansada midhaha sameeyey abwaan Maxamed Xaaji Ismaciil Barkhad cas (IHUN)..

Dhalintii wadankiyo dhulkaanu nahoo
labbood iyo dhadig wax meel dhiganoo
dhibtiyo xumihii dhammaan aragnoo
inaanu dhalaniyo inaanu dhimanoo
maantaaan waxba nooga dhaxaynayn

Dhalintii wadankiyo dhulkaanu nahoo
ninkaan dhididini xornimo ma dhaxlee
haddaanu dhirta korin daayeer ma dhergee
inaanu dhalaniyo inaanu dhimano
maantaan waxba nooga dhaxaynayn

Dhalintii wadankiyo dhulkaanu nahoo
afartaa dhiigayaga gorfaha ku dhamma
markay ka dhergaanna na dhabaqsada
inaanu dhoofniyo inaanu dhimano
maantaan waxba nooga dhaxaynayn

Dhalintii wadankiyo dhulkaanu nahoo
calankaad dhumisen inaanu dhisnoo
dharaar ka cadayno dhay geeloo
inaanu dhidibniyo inaanu dhimano
maantaan waxba noogaa dhaxaynayn

Maansooyin badan iyo laxano faro badan ayuu curiyey Cabdilaahi Qarshe,Hase yeesh
xulka maansooyinkiisii iyo xusuusinta wadanimadii abwaanka ayaa bahda mareegta
Farshaxan ay bulshada la wadaageysaa.Wuxuu kulansadey Cabdilaahi Qarshe inuu
buuxiyo afarta kaalmood ee fanku u baahan yahay in la soo bandhigi karo.Erayada intuu
sameeyo ayuu laxankiina saaraa,ka dibna danaka tumistiisa u hawlgalaa kuna
dhameystiraa inuu ku luuqeeyo.Waa hawl u baahan kari laheyd afar qof oo kala duwani
sida caadiga ahi inay kaalmahaa kala buuxiyaan.

Cabdilaahi Maxamed Maxamuud “Cabdilaahi Qarshe” wuxuu ku dhashay magaalada
Moshe ee wadanka Tansaaniya gu’gii 1924.Wuxuu la dhashay afar wiil iyo gabadh.
Cabdilaahi aabihii Maxamuud iyo reerkoodu waxay deganaan jireen gobola Sanaag ee
Somaliland.Beryahaa waxaa aad u caan ahaa tacabirka oo iminka looba yaqaan
tahriib.Koox lug iyo gawaadhiba isticmaashey oo Tansaaniya ku socday ayuu maxamuud
ka mid noqday,aad baanu u nasiib badnaa inuu ka mid noqdo tiro yar oo ka badbaadey
dhimasho iyo dhaawacba.Maxamuud oo nabad qaba ayaa gaadhey magaalada Moshe ee
wadankaa tansaaniya.Dadku waxay u tacabiri jireen si nolosha lagu noolaa mid ka roon
loo raadsado.

Qoyska uu Cabdilaahi Qarshe ka soo jeedo waxay ahaayeen muriidyadii Sheekh
Isaxaaq.”waan fahmayaa hawsha muriidka oo aniguba waxaan ka soo jeedaa reer hawshaa
muriidnimada hayn jiray” ayuu yidhi Dr.Maxamed Rashiid Sh.Xasan oo wareysi dheer la
yeeshay Cabdilaahi Qarshe.Dr.Maxamed rashiid waa wasiiru dawlaha arimaha dibada ee
wadanka Soomaaliland iminka.

Xilli ku beegnayd 1931 ayuu Maxamed Maxamuud dhintay.Hooyadii Dahabo Xirsi ayaa
hantidii reerka dhamaan wada iibisay waxaanay u guureen magaalada Cadan ee wadanka
Yemen.Hase yeeshee muddo ka dib ayey yimaadeen wadanka Soomaaliland kuna soo
degeen magaalada Maydh oo ay u sii dhaafeen magaalada Ceerigaabo. Laba sanaadood ka

dib ayey dhamaan reerku dib ugu laabteen Cadan.Magalaadaa Cadan ayuu cabdilaahi barashada diinta (Quraanka, xadiisyada, Fiqiga ,Naxwaha carabiga,iwm) iyo waxbarashadii madaniga aheydba ku qaatey.

Muddo ka dib wuxuu u soo wareegay dalka Soomaaliland kana qayb qaatey halgankii ummada ee gobanimodoonka iyo dib u soo celinta xornimadii reer Soomaaliland markii deeqda u bixiyeen.“Ilaahay ha u naxariistee 28-kii October 1997-kii, ayuu ku geeriyyoday magaalada London, 3-dii November 1997 maalin Isniiin ah, ayaa lagu aasay magaalada Hargeysa,” ayuu yidhi Boobe

Dabayaaqadii bishii Oogosto ,2010 ayaa munaasibad uu soo qaban-qaabiyeen Ururka Fanka iyo Dhaqanka Soomaalida SAAC loogu daah-furay Xarunta Fanka iyo Farshaxanka ee Cabdilaahi Qarshe (Qarshe Arts Center.Waxaana xafladaa lagu lagu qabtay Hotel Maansoor ee magaalada Hargeysa.

Maansooinka uu curiyey Cabdilaahi Qarshe waxaakaloo ka mid ah maansada Dunni Gabowdey:

Dadkaan ogaynee
Dunidaan la yaabee
Dib u fiirsigeeda
Lagu diirsan maayee
Waa mid ay la duushiiyo
Dayaxa u dhaweyssiyo
Mid kaloooy ka durugtooy
Dibadaha ku duugtee

Waa duni gabowdoo
Ilayn waa dumaalee
Mid malab darsanayaa
Midna dacar ka leefaa

Dabar iyo hogaan iyo
dani seeto weeyaan
waxay damacdo mooyiyee
qofna diidi maayee
waa mid ay dibirisooy
Baryo daadaheysoo
Mid kaloooy dulaysooy
Darxumo u dhamysoo

Waa duni gabowdoo
Ilayn waa dumaalee
Mid malab darsanayaa
Midna dacar ka leefaa

Kay dooraneysoow
Ha ka moodin daacadee
Waxay kugu dilaysay
Horta kugu dayeysa
Kay dahab u diidoow
Way kaa dabooliyee
Kay dooni siisoow
Way kaa daloolinee
Kay waayo daysoow
Iyadaa ku dooxiyee

Waa duni gabowdoo
Ilayn waa dumaalee
Mid malab darsanayaa
Midna dacar ka leefaa

Daadkay ku raacinee
kay diric u galisoow
Way kaa dilaacinee
Kay meel dagsoosoow

Ilaahay ha u naxariisto Cabdilaahi Qarshe, ummada reer Soomaaliland-na way ogtahay kaalintii uu kaga jiray halgankii gobanimodoonka ee Maandeeq.

N.B: Barnaamijkeena Xulka maansooyinka iyo Xuska abwaanka wuxuu noqon doonaa Insha Allah joogto. Taladiina, tusaaleyiina, tilmaantiina iyo ka qayb qaadashadiinaba waa la soo dhaweynayaa...

Tixraac:

- Taariikhdiid Saxardiid Maxamed Qolka Kaydka Mareegta Farshaxan
- Maansooyinka Cabdilaahi Qarshe Qolka Kaydka Mareegta Farshaxan
- Xuska 10 Guurada Cabdilaahi Qarshe Qalinkii : Boobe Yuusuf Ducaale
- Interview with the late Abdullahi Qarshe Wareysi Qaade: Dr.Maxamed-Rashid Sh.Xasan
- Mareegaha Farshaxan, Hadhwanaagnews, OOdweynenews, Gabileynews, Heesta, Askarkotor

Diyaarintii iyo Tifatirkii
Fu'aad Sheekh
Bahda Mareegta Farshaxan
www.Farshaxan.com ama www.Farshaxan.org